

Waxbarashada Ooneelka: Aasaasiyaadka Waalidka ee Tignooloojiyada

<https://www.dpsk12.org/coronavirus/#familyresources>

Dookhyada Interneetka:

- **Interneetka Gurigga:**
 - [Aasaasiyaadka Interneetka \(Internet Essentials\)](#): barnaamijkaan wuxuu baxshaa adeegga interneetka guriga oo raqiis ah. Si aan uga jawaabno dalabka sii badanayaa ee waxbarashada oonleenka ah, IE waxay bixinaysaa qiimo dhimis qaas ah iyo interneetka
 - xawaarihiisu sareeyo.
- **Aaladaha Interneetka ee ay DPS samayso:**
 - Aaladaha Interneetka ee ay DPS samayso waxay u sahlaayaan ardayda aan haysan interneetka guriga inay helaan khadka interneetka wireless ka oo gaar ah. Aaladahaan waxaa la siin doona ardayda u baahan, kadib fasaxa gu'ga. Xog dheeraad ah oo ku aadan xiliga qaybinta aaladaha ayaa lala wadaagi doonaa hogaamiyaasha dugsiyada.
- **Dookhyada kale:**
 - Waxaa jiro dookhyo kale oo interneet kuwaasoo baxsha khadka interneetka oo leh xawaaryaal kaladuwan, ayadoo ku xiran helitankiisa aagaga kaladuwan ee degmada.
 - **KHADKA XARIIRKA TALEEFANKA:** Taleefanada moobilka shaqsiga ah ayaa loo adeegsan karaa inay noqdaan aalada khadka si loo siiyo interneet aaladaha kale, sida Chromebook. Qarashaad dheeri ah ayaa la goosan karaa, waydii shirkada adeegga bixisa wixii xog dheer ah.
 - **WiFi Dadwayne:** (Waxaa qasab ah in dad isticmaalayaa ay u jiraan 100 talaabo gudaheed WiFi ga, kaasoo laga yaabo inuusan dadkoo dhan u shaqayn marka loo joogo aaga guriga; xasuusnoow inaad digtoonaato maadaama WiFi dadwaynuhu uusan lahayn isla amaanka dookhyada kale)
 - [Aalada Interneetka ee Xfinity WiFi Hotspots](#) (adeegga ayaa kaladuwan daafaha magaalada)
 - [Maktabada Dadwaynaha ee Denver](#) - DPLWireless (wuxuu ka shaqeeyaa meelaha u dhawdhaw DPS ama aaga baakinka)
 - Martida DPS (wuxuu daboolaa meelaha u dhaw dugsiyada DPS ama baraha baakinka)

Ilaalinta Badqabka Ardayda

- Sifaynta DPS:
 - DPS waxay samaysaa intay awoodo si ay u hubiso in ardaydeenu ku isticmaalaan si amaan ah. Sifeeyaasheena websetka ee aaladaha degmadu samayso iyo khadadka degmada oo dhan, waxaa lagu xiray aalado xanibaaya mawduucyada xunxun ilaa inta macquulka ah.

- Haddii uu arday adeegsanaayo Chromebook ama iPad ay degmadu leedahay asagoo jooga dugsiga ama guriga, waxay sii maraysaa mar kasta hanaanka sifaynta webseetka ee DPS.
- Si lamid ah dhammaan qalabka tignooloojiyada, waxaa jiro qaabab uu isticmaaluhu iskugu dayi karo inuu kaga gudbo sifeeyaashaan inerneetka si uu waxyaabo xunxun u galo. Waxaan ku boorinaynaa waalidiinta inay isha kuhayaan adeegsiga interneetka ee ilmahooda.
- **Qalabka Ka hortaga Xoog sheegashada:**
 - DPS waxay adeegsataa Gaggle si ay ula socoto hawlaha lagu samaynaayo qalabka degmadu maamushu ee leh Google ka, ayna ku jiraan Dukumiintiyada, Xaashiyada, limeelka iyo Wada sheekaysiga. Haddii Gaggle ay ogaato tusaale muujinaaya xoog sheegasho, dhibaatayn oonleen ah, ama hawlaha kale ee sharci darada ah oo dhacaaya, ardaygu wuxuu lumin doonaa isticmaalka aalada degmada iyo softweerkedaba.
- **Awooda Ilaalined ee Waalidka:**
 - Waalidiinta ayaa sidoo kale gali kara aaladaha ardaydooda si ay u arkaan taariikhda baroowsarkooda. Ardaydu ma gali karaan aalada ayadoo adeegsanaaya naqshada incognito.